

Wada xidhiidhka si badbaado leh

Kheyraadkani wuxuu ku siinayaa qaar ka mid ah tallaabooyinka ugu horreeya ee la taaban karo ee loogu wada xiriiro si badbaado leh onlaynka si looga fogaado noocyada caanka ah ee raadraaca onlaynka wuxuuna daboolayaa tallaabooyinka sida ka bixista akoonnada, daminta goobta wadaagga, dibu-eegista settingka asturnaanta, iyo beddelidda furayaasha sirta ah.



Kuwani waa talooyin guud oo ku saabsan ilaalinta badqabka aaladdaada. Tallaabooyinka saxda ah way ku kala duwanaa karaan aaladuhu waxayna isbeddeli karaan waqti kadib.



iPhone-ada iyo iPad-ada, waxa aad inta badan ka heli kartaa setting-ka adiga oo taabanaya "Settings" ee Home Screen, kaddibna hoos u jiidaya si aad u muujiso barta raadinta. (Wixii caawinaad ah, ka eeg <http://tiny.cc/iphonesearch>.)



Aaladaha Android-ka, kor uga riix Home Screen-ka: barta raadinta ayaa soo bixi doonta oo ay ku qoran tahay "Search Your Phone and More". Ku qor setting-ka aad raadinayso barta raadinta.

Ka bax dhammaan akoonnada

Waxaa laga yaabaa inaad diiwaangashan tahay ababka qaar in ka badan hal aalad. Waa kan sida meel walba looga saaro *Facebook*: taabo **Saddexda dhibcood** kadibna **Settings**, kadibna "Password and Security" kadibna "Accounts Center". Taabo "Password and Security" kadibna "Where You're Logged in".

Hadda waxaad arki doontaa dhammaan akoonnada *Facebook-gaaga*, *Instagram-gaaga* ama *WhatsApp-gaaga*. Taabo mid kasta si aad u aragto aaladda ku jirta, kadibna taabo "Log Out" mid kasta oo aan ahayn telefoonkaaga.

Astaanta furaha



Saddexda dhibcood



Setting-ka



Saddex dhibcood oo toosan



Toggle-ka

Wada xidhiidhka si badbaado leh

Dami wadaagista goobta ee baraha bulshada

Tani waa muhiim haddii aad isticmaasho *Snapchat*, taasoo ku tusinaysa meesha aad ku sugan tahay maabka. Si aad taas u samayso, fur *Snapchat* oo taabo astaanta borofaylkaaga. Marka xigta taabo **saddexda dhibcood ee taagan** ee dhanka sare ee midig oo hoos ugu dhaadhac qaybta "Who Can..." Haddii aad taabato "See My Location" waxaa soo boodi doona qoraal ay ku qoran tahay "Ghost Mode." U **Beddeli** taas "On".


Facebook-ga ama *Instagram-ga*, waxaad ka damin kartaa goobta adigoo taabanaya **Settings** > Privacy > Location Services kadibna taabo u **Beddel** ta xigta. Inta badan shabakadaha kale ee bulshada waxay dhigaan meelo la mid ah goobaha sida "Privacy" ama "Safety".

Dibu-eeg goobaha gaarka ah

Dhammaan akoonnada shabakada bulsheed waxay leeyihiin setting gaar ah, kuwaas oo aad inta badan ku gali karta adigoo taabanaya **Settings** kadibna wax la mid ah "Privacy", "Privacy and Security" ama "Audience." Hubi in loo dhigay inay keliya muujiso waxa aad u gudbisno Asxaabta.

Beddel furaha sirta ah ee kaydka cloud

Haddii aad u isticmaasho wax kaydintaada sawirada ama muuqaalada, sida *iCloud* ama *Google Drive*, hubi inaad beddeshay furaha sirta ah si aanu qof kale u gelin.



Financial contribution from



Public Health
Agency of Canada

Agence de la santé
publique du Canada